


Fayraska usub ee corona kuma faafa oo keliya wadamada qabow, mana daaweyn kartid COVID-19 adoo u digaysa qabow ama heerkul kulul



Fayraska cusub ee corona wuxuu ku faafaa dhamaan wadamada iyadoon loo eegin cimilada iyo xaaladaha cimilada.

Labada waddanada kulul iyo kuwa qabowba waxaa laga soo sheegay kiisas cusub ee fayraska corona, waxaana laga yaabaa inaad qaadsiisid cudurka loo yaqaan fayraska cusub ee corona iyadoo aan loo eegin sida qorraxdu u tahay, qoyaan, qabow ama diirran tahay cimiladu. Isu dhigida qoraxda ama heerkul aad u sarreeya ama hooseeya kaama ilaalinayo inaad cudurka qaaddo, mana ka bogsiiiso dadka cudurka qaba.

Habka ugu fiican ee aad iskaga ilaalin karto fayraska cusub ee waa inaad u hogaansanaato talooyinka ay soo jeedinayaan masuuliyiinta caafimaadka.